

DIS126-SO

Ujeeddada xoqista iyo hoolidda ilkaha iyo xididka waa in laga nadiifiyaa huurada iyo mida dhagaxowday ilkaha dushooda iyo cirridka hoostiisa, iyo in ilkaha iyo xididada sabiibax laga dhigo. Sancadani sidoo kale waxaa ku jira in meesha laga saaro bakteeriyada iyo sunteeda taas oo la xirriirta huurada iyo mida dhagaxowday.

Filashada Daaweynta kadib:

Raaxo la'aan: Raaxo la'aanta bukaanku waxay hoos u dhacaysaa dhawr saac gudohood ilaa dhawr maalmood gudohood sancada kadib. Raaxo la'aanta markiiba la dareemo sancada kadib waa dikaan iyo xanuun

Saliilyada ilkaha: ilkaha bukaaku waxaa laga yaabaa inay ku saliilyoodaan is badalka heerkulka iyo/ama macaanka daweynta kadib. Saliilyada heerkulka waxa laga yaabaa inay noqoto mid daran laakiin dhakhsa way yaraanaysaa. Wixii saliilyo ah xiliga cadayga ama dun ku nadiifinta ilkaha dhexdooda waxay ku baaba'aysaa dhawr maalmood gudahood.

Muuqaalka: oogada kore ee xididka ee ilkaha la daweyyay ayaa laga yaabaa in wax badan muuqdaan marka baraku ka dhaco cirridka xanfay. Tani natiijadeeda waxay noqon kartaa ilkaha dhexdooda inay ka muuqdato kala fogaan la dareemi karo.

Tilmaamaha si loo yareeyo Calaamadaha:

1. Si jilicsan laakiin dhameystiran huurada uga nadiifi maalintii 2 ilaa 3 jeer adoo istimaalaya cadayga (gacanta ama farsamada), dunta ilkaha, iyo / ama qalabka kale ee daryeelka caafimaadka oo ay ku taliyeen kooxda ilkaha.
2. Ku luqluqo biyo qandac ah oo cusbo leh (ku qas $\frac{1}{4}$ malqacada shaaha si dhameystiran hal koob oo biyo diiran ah) hadba sida loogu baahan yahay hal ilaa laba toddobaad.
3. Dawooyinka xanuun baabiyaha ee aan qoraalka ahayn ayaa kaa caawin kara hoos u dhigida raaxa la'aanta (Ibuprofen, Acetaminophen).
4. Waxaa laga yaabaa in lagu qoro (Chlorhexidine mouth rinse) dawada afka lagu dhaqo si ay kaaga caawiso xanfafka iyo dhiigbaxa. Tilmaamaha isticmaalka: ku luqluqo 15 mL oo ah dawada afka lagu dhaqo 30 il biriqsi maalintii laba jeer. Ama, dhex gali cadayga burushka ah daawada afka lagu dhaqo oo ku caday cirridka bukaanka maalintii laba jeer cadayashada kadib.
5. Wax yaabaha saliilyada dajiyi ayaa kaa caawin doona saliilyada kuleylka, qabowga iyo macmacaanka. (Tan waxaa ka mid ah dawooyinka cadayga fluoride ee qoraalka ah, dawada afka lagu dhaqo ee Fluoride iyo dawada ilkaha ee Sensodyne).

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeedo waxbarasho oo kaliya. Looguma talagalay inuu badalo talooyinka ay bixiyaan daryeelayaashaada caafimaadka. Haddii aad qabto wax su'aalo ah la hadal dhakhtarkada ama kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaan Gillette oo qaba su'aalo ama walaac deg deg ah, fadlan la xiriir khadka kalkaalisooyinka 651-229-3890.